CISP
COMITATO INTERNAZIONALE
PER LO SVILUPPO DEI POPOLI

international alert

# Haga ha wada-hadalka Bulshada ee nabadaynta

**2017**



# Arar

Sanad kii 2016, Hay'ada International Alert oo kaashanaysa Hay'ada CISP ayaa waxay ka bilaabeen Abaabul Wada-hadal Bulsho labo degmo oo ka tirsan magaalada Muqdisho oo loogu tala galay inuu bulshada ka haqabtiro inay si xor ah u cabiraan arimaha quseeya gaar aahan ayada oo aan la soo bandhigayn wada hadalkooda. Mashruucani wuxuu qayb ka ahaa mashruuc gude-ballaaran oo ay soo hoosgalayaan fidinta adeegyada bulshada, iyo ilaalinta abaabullo gaar ah oo xoogga saaraya caaddooyinka bulshada oo ku saabsan tacdiyadda ka dhanka ah jinsiga.

Arinta ugu weyn ee laga fahmayo wada-hadal bulsho oo dhan ah ayaa ah inuu wada hadalku keenayo in dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada ay ka qayb noqdaan go'aanada bulshada ay qaadato. Sidaad darteed, wadahadalku wuxuu u shaqeeyaa sidii madal iyo geedi socod bulsho kaas oo loo isticmaali karo in lugu xaliyo dhibaato ama khilaaf kasta oo bulshada saamayn ku yeelanayo.

Adeegsiga habkan waxqabad aqooneed, shaqaalaha iyo tababarayaasha wadahadalka bulshada waxay ku shaqeeyeen ujeedada ah in ay aqoonta ku daraan ficil oo ay taageeraan joogtaynta wadahadalka bulsho ee Muqdisho dhexdeeda. Haga han waa natiijada aqoon wadareed laga bartay abuubulka wadahadalka ee bulshada. Haga han waa loo qaabeeyay qoridda casharadii laga bartay Soomaaliya iyo sidii loo hagi laha oo loo meel marin lahaa waxqabayada la mid ka ah. Waxaa looga gol lahaa in uu u noqdo tixraac ka qayb galayaasha wadahadalka bulshada kuwa hadda iyo kuwa mustaqbalkaba.

Qaybta 1aad ee haga haan wuxuu qeexayaa halka ay marayso xaalada dalka soomaaliya haatan iyo asalka mashruuca wadahadalka. Qaababka iyo hab-dhismeedka horseeday tixraaha waxaa lugu faahfaahiyay qaybta 2aad. Qaybta 3aadna, waxuu ka hadlayaa saamaynta uu mashruucan ugubka ah sameeyay. Ugu dambeyna, qaybta 4aad waxuu tusinayaa (sida loo sameeyo) waxayna u tahay kuwa ka qaybgalay mashruucan, iyo sidoo kale dadka danaynaya inay u isticmaalaan hab-tixraacan mashaariicdooda. Tusaalayaal ku saabsan wada-xaajoodyo kala gadisan oo la qabtay xiligii wada hadalada ayaa ku jira haga-han.

# 1. Taariikhda-Nabadaynta iyo Wadahadalka Soomaaliya

Dagaalada mudada socday ee Soomaaliya ka jiray waxaa sababay arrimo kala duwan, waxaana ka mid ah arimahaas xiisada qabiilada iyo kuwa beelaha, burburkii dowladnimada, dumidii dhaqaalaha dalka, khilaafka qaybsiga ilaha dhaqaalaha, dagaalada iyo askaraynta qaybaha kala duwan ee iska soo horjeeda.

Doorashadii ugu dambaysay ee ka dhacday dalka, (February 2017) awoodana la iskugu wareejiyay si nabadeed iyo hawlaha lugu doonayo in ay dowlad federal ah oo shaqaysa ka hanaqaado dalka waxay keeneen dareen niyadsami leh oo loo qaaday dib-u heshiisiinta siyaasadeed ee dalka iyo dhismaha dowladnimo. Balse iyadoo ay taasi jirto, waxaa hubaal ah in dhibaatada soo jiitantay ee dalka ka jirtay ay abuurtay kala qaybsanan xoogan walina ay dalka ka jirto iskukalsooni la'aan wayn, iyo cuqdad ku kala jirta bulshada.

Nabadgalyada magaalda Muqdisho way soo hagaagaysay tan iyo xiligii ay Ashabaab dib uga gurteen caasimada sanadkii 2011, inkastoo magaaladu ay wali wajahayso weeraro joogto ah (sida qaraxyo iyo dilal beegsi ah). Hadana marka laga hadlayo bulshada dhexdeeda, wali waxaa jira xaalado nabadgalyo oo qof walba uu ka walwalayo in xitaa la soo hadal qaado taasoo ku saabsan arimo dadka saamayn ku leh. Intaas waxaa dheer, iskahorimaadyadan joogtada ah waxay ka bixiyeen sawir xun ama khaldan dadka ku barakacay dalka gudihiisa.

Barakacayaashu waxay isugu jiraan kuwo ku nool xeryaha iyo kuwo bulshada marti ugu ah magaalooyinka. Muqdisho gudeheeda waxaa ku sugan barakacayaal lugu qiyaaso ilaa 30,000, badidoodna waxay ka soo barakaceen gobolada Shabeelooyinka iyo gobolka Baay. Dadkaas waxay ka soo baxsadeen dagaalo iyo dhibaatooyinka dabiiciga ah. Sidaa darteed, waxaa barakacayaasha iyo kuwa deegaanka dhex mara iska hor'imaadyo badan.

## Wada-hadal iyo Dhexdhexaadin

Intii ay dalka colaaduhu ka jireen, waxaa jiray ololayaal wada-hadal iyo dhexdhexaadin fara badan oo dalka Soomaaliya ka dhacay, kuwaasoo isugu jiray kuwo heer qaran ah oo u dhexeeya qaybaha iska soo horjeeda iyo heer deegaan. Heerka deegaanka, waxaa jiray dadaalo lugu doonayay in lugu dib u heshiisiiyo bulshooyinka ay colaaduhu dhexmareen iyadoo la isticmaalayo xeerarkii dhaqanka, gogol iyo geed, iyo habab tixraac oo kale oo laga soo qaatay xaalado kale. Dadaaladaas waxaa hormuud ka ahaa culumada, duqayda iyo maamulada deegaanka iyo sidoo kale hay'adaha aan dowliga ahayn iyo kwo kale.

Waxaa la sameeyay abaabulo badan oo looga dan lahaa tacadiyada jinsiga iyo caadooyinka bulshada ee tacadiyadaas sababa. Isku deeyo badan oo lugu doonayay in xadgudubyadaas looga hortago, inkastoo lugu niyad samaa, waxay ku wajahnayd oo qura wacyigalin aynan la socon tageero bulsho oo ku qotoma heerarka badalka dhaqanka iyo dabeecada. Inkastoo ay jiraan hay'ado garwaaqsaday dhibaatada ay keenayso in waxwalba lugu soo kobo wacyi galin, hadana ma aynan haysan wakhti ku filan, dhaqaale iyo xirfad hawleed ay ugu huraan sidii loo hor'umarin lahaa xeelado lugu taageero bulshooyinka heerarka kala duwan ee badalida hab-dhaqamadaas.

Ururo bulsho oo tiro badan aya taageero uga helay Hay’adaha aan dowliga ahayn ee Caalamiga ah si ay kor ugu qaadaan wacyigalintaas ayna u hirgaliyaan wada-xaajood bulsho oo lugu wadaagayo xogaha ku saabsan arimaha xoojinta ama awoodsiinta dumarka, ka hor’taga xadgudubyada jinsiga iyo sidoo kale ka hortaga gudniinka fircooniga, waxay gaareen guulo lugu amaani karo sida ay u gaareen bulsho badan. Balse hadii aan la helin qaabdhismeed loo wajaho, tacadiyada ku saabsan jinsida waxaa muuqata khatarta in ay dadbadan sahladaan ama loo arko wax aan qiimo weyn lahayn marka la joogo miisaska wada hadalka iyo xogwadaaga hay’adaha aan dowliga ahayn.

**Qeexidd-Jinsiga iyo nabad-dhisidda**

*Nabad-dhisidda* waa hab firfircooni oo leh ka qayb galin iyo dhisidda xiriiro u dhexeeya qaybaha kala duwan ee dadka iyo kooxaha oo ka wada tirsan bulshada. Waxaa looga gol leeyahay in laga dhex abuuro nabad iyo wada noolaansho iyo Isfahan u dhexeeya dhinacyo kala duwan ama dad kala duwan oo kawada tirsan bulshada. Tani inta badan waa hab ka soo bilaabanaya hoos ilaa kor kaas oo diiradda lagu saarayo dhisidda xiriiro wanaagsan.

Jinsiga waxaa loola jeeda shaqooyin iyo kaalinno ay bulshadu u astaysay noocyada kala duwan ee raga iyo dumarka waxaana saamayn ku yeesha astayntaas, dhaqan, diin, arimaha bulshada, sababo dhaqaale, iyo caadooyin ayadoo ay intaa dheeryihiin eexasho dhanka Jinsiga ah. Waa muhiim in la fahmo in khibradaha kala duwan iyo saamaynta ay collaadu ku yeelatay raga iyo dumarka, wiilasha iyo gabdhaha taasna waxaa ku jirta in ay saamayn ku yeelanayso kaalinta jinsiga ka hor collaadda iyo ka diba.

## Waa maxay Wada-hadal?

Waa hab lugu dhiso nabada, wada-hadal waxa loola jeedaa in si ku talagal ah loo abaabulo wada sheekaysiyo dhexmara dad ay colaad dhexmartay danta laga leeyahayna ay tahay in laga dhexdhiso buundooyin kalsooni qaybaha ay qusayso iyadoo loo diyaarinayo goob nabadoon ay si toos ah ugu wada-xaajoon karaan dadka iska soo horjeeda. Nidaamkani wuxuu horseedayaa Isfahanka fiicni, xiriirka oo hana-qaada iyo dadka oo dareema in ay iyagu un wataan arimahooda hoose. Wada-hadalku wuxuu isku keenaa dadka, wuxuuna fududeeyaa wadaxiriirida kooxaha colaadu ay dhexmartay, si loo dhiso kalsoonida iyo isdhexgal bulsho. Wada-hadalku waa qaab ay isugu soo dhawaadaan dad is khilaafsan oo ku saabsan arin, iyagoo u jeedada laga leeyahay ay tahay sidii ay wax badan uga baran lahaayeen kala aragti-duwanaanshahooda. Dadka danaynaya inay wada-hadlaan waxay inta badan ka imaadaan asalka kala duwan (isir, diin, jinsi, da’ iwm) waxayna u muuqdaan inay leeyihiin fikrado kala duwan, aragtiyo iyo nidaam diineed, ku leh saameyn ku saabsan iskahorimaadka gacanta.

Arrintani waxay ku qotantaa fikirka ah in daneeyayaal kala duwan la isku keeno si ay uga doodaan arrin khusaysa, loona abuuro goob ay sida wadajir ah wax ugu falanqeeyaan, ayaga oo u raadinaya xalal macquul ah iyo go’aamo arrimaha saamaynta ku leh. wada-hadal guulaystay oo laga wada qayb galay waxaa ka dhalan kara in si nabad galyo ah loo xalliyo khilaafaatka. Si kastaba ha ahaatee, ujeedada wada-hadalku markasta ma aha in lagu xalliyo khilaaf gaar ah.

Ujeedada wada-hadalka aalaaba waa in lugu taakuleeyo bulshooyinka (iyadoo la adeegsanayo kalsooni dhisid, xiriir samayn, iyo Isfahanka oo kor loo qaaday) sidii ay u adeegsan lahaayeen dhisme awood ay kula tacaalaan arimahooda. Si walba oo loo wada hadlo, ujeedadu waa in ay ka soo baxdaa aragti midaysan oo waarta taasoo u noqota gundhig isbadalka.

Intii lugu guda jiray sadexdii sano ee tagtay, Hay'ada Digniinka Caalamiga ah (international Alert) waxay ka shaqaysay magaalada Muqdisho, iyadoo gacan-saar la leh CISP sidii loo unki lahaa barnaamij wada-hadal nabadayn ah oo loo qabto dadka colaaduhu ay saameeyeen oo ku dhaqan labo degmo.

Ujeedada ugu weyn ee loo bilaabo wada-hadal waa in gogol nabadeed ay hesho bulshadu si ay uga wada hadli karaan arimahooda. Habka wada-hadalku wuxuu u suurta geliyey xubnaha bulshada in ay kordhiyaan isfaham iyo hagaajinta xiriirkooda, iyo in ay awood u yeeshaan bulshooyinka si ay wax uga qabtaan arimahooda iyagoo u maraya habab waxdhis iyo hal abuur leh. Wada-hadalka la adeegsaday ma lahayn himilooyin lagu xallinayo dhibaatooyinka gaarka ah, laakiin waxaa loo adeegsaday si uu ugu fududeeyo bulshooyinku inay si furan uga wada-hadlaan dhibaato kasta oo ay qabaan, si ay u kordhiyaan fahamkooda ku aadan arimahaas iyo in ay ka eegaan aragti kala duwan oo ku saabsan sida arrimahaas ay u saameynayaan kooxaha kala duwan ee bulshada.

Waxqabyada qabsoomay inta uu socday wadahadlku:

| | |
|---|---|
| **Isku diyaarinta wadahadalka** | Ku tababaridda wakiiladda bulshada mabaad'ida iyo xirfadaha wadahadalka iyo hababka loo kormeero loona qoro astaamaha isbadalka xiriirada. |
| **U tagidda bulshada** | La kulanka xubnaha muhiimka ah ee bulshada si loo fahmo xaaladda, bulshada iyo xiriiradeeda, iyo infiiro loo yeesho isbadallada loo baahanyahay isla markaana lagu cabiro in hor mar lagaaray. |
| **Samaynta xiriiro** | In loola kulmo wakiilada bulshada, hay'adaha' maamulka deegaanka iyo ururada si loo abuuro is aaminid iyo dadkaas lo sharaxo xaaladooda isla markaana lagu go'aamiyo dadka ay rabaan in ay la hadlaan, iyo sidii ay rabaan in uu wadahadalkoodu u qabsoomo. |
| **Daadihinta shirka** | Isku keenidda kooxaha bulshada si ay uga hadlaan xaaladooda iyo ku taageeridda sidii ay u go'aansan lahaayeen waxii ay rabaan in laga qabto. |
| **Qoridda isbadal** | Kormeeriddu waxay isbadalka ka qoran kartaa cabiraadii awal la dajiyay. Waxaa la samayn karaa qiimayn gooni ah si loo ogaado wax ku oolnimada mashruuca iyo saamaynta uu ku yeeshay dadka gaar ahaan iyo bulshada si guud ahaaneed. |

# 2. Habka mashruuca

Qaybtani waxay sheegaysaa habka ay isticmaaleen hawl wadeenada Inernational Alert/CISP ee Muqdisho.

## Sidee ayuu ahaa qaabka loo wajahay wada-halka bulshada?

Abaabulka Wadahadalka bulshada waxaa asaas u ahaa kuwan:

***Yoolka wada-hadalku waxa weeye in lagu taageero bulshada sidii ay uga qayb qaadan lahayd waxna ugu darsan lahayd arrimaha bulshadu ay ka walaacsan tahay.***

Si gaar ah:

- In lataageero isdhexgal furan nabadna ah oo u dhexeeya xubnaha bulshada
- In lagu daro kooxaha kala duwan ee bulshada sidii ay uga qayb qaadan lahayd daraasad iyo falanqayn loo dhan yahay
- In la dhiirigaliyo in si wadajir ah loo raadiyo xulashooyin kala duwan, xalal macquul ah, aragtiyo iyo abaabullo horr marinkara bulshada.

Qabashada wada-hadalkan waxaan uga gol leenahay aan ogaano suurto galnimada, dhiiranaanta iyo ka go'naanta bulshada sidii ay ugu isticmaali lahayd fursadaan in ay isku yimaadaan oo ay wax uga qaban lahaayeen arrimaha khuseeya. Wada-halku wuxuu diiradda saaraya khilaafka iyo haweenka, guud ahaan u jeedada laga leeyahayna waa nabad-dhisidda.

Wadahalku waa hab uga baahan wakhti, hanti, iyo hawlkarnimo dhammaan inta ku Lugg leh. Diyaar garow fiican waa muhiim-in xiriirro lala sameeyo bulshada iyo maamulka deegmaada, qiimaynta xaaladda ammaanka, u diyaarsanaanta in wax lala qabsado, in la muujiyo jajabnaan iyo falcelin intuba waxay leeyihiin muuhmad wayn. In layeesho yool, u jeeddooyin, doorar iyo kaallimo waa muhiim. Daahfurnaanta iyo maaraynta filashooyinka bulshada ayaduna waxay leedahay muhiimad gaar ah. Fahanka xaaladda emooyinka taas oo ay soo hoos galayaan fahanka qaab-dhismeedkooda awoodeed, caadooyinka dhaqan-bulsho waxay ka dhigayaan geedi socodka mid munaasab ah. Wadahalku wuxuu ka dhacayaa meel ammaankeedu uu aad u liito, bulshooyin kala qaybsan oo walwalsan, oo ay dhex joogaan hawl wadeeno aqoon leh oo ka socdo hay'ado caalami ah waxkasta waa la filan karaa. Waa in wakhti hore la keenaa qorshayaal lagu yaraynayo khatarta, waana in la hubiyaa oo la dhaqan galiyaa.

# Side ayuu ahaa qaab-dhismeedka geedi socodka wada-hadalka bulshada?

Qaybtan soo socota waxay ina tusaysaa sidii qaab loogu samayn lahaa mashruuca wadahalka ee Muqdisho.

## Kooxaha wadahadalka bulshada

Wada-hadalku wuxuu ka dhexdhacay bulshooyin iska waraysanaya baahiyaha jira waxaana looga gol lahaa in la abuuro jawi furan oo nabdoon si ay bulshooyinku uga wadahadlaan arimaha ay doortaan.

Kooxo wada-hal ayaa laga sameeyay laba degmo oo ka tirsan Muqdisho. Koox kasta waxay qiyaastii ka koobnaayeen 12 qof oo ka tirsan xubnaha bulshada. Ka qayb galayaasha wada-hadalka waxaa laga soo xushay wakiilo matalayay kooxo kala duwan oo ka tirsan bulshada noocyeheeda kala duwan kuwaas oo laga ogaaday heerka daarasada khilaafka (conflict analysis stage). Kooxahaas waxaa ku jiray haween, dhalinyaro,dad waawayn, oday dhaqameedyo, wakiilo ka socday barakacayaasha, wadaado, adeeg bixiyayaal (sida. Kuwa caafimaadka ka shaqeeya iyo waxbarashada) iyo maamulka deegaanka.

Shuruudaha ugu wayn oo lagu soo xushay ka qayb galayaasha waxay ku salaysnayd dhiiranaantooda, hawlkarnimadooda iyo xiisaha ay u hayaan in ay ogaadaan arimaha bulshada. Waxaa tixgalin la siiyay markii la samaynayay kooxaha, dhalshada, bulshada iyo dhaqanka ay ka tirsanyihiin, da'da iyo isu dheeli tirnaanta jinsiga. Afar kooxood ayaa waxay ahayeen isku dhaf (rag iyo dumar), hal koox waxay wada ahaayeen dumar halka hal kooxna ay wada ahayd rag. Koox kasta waxay u kulmi jireen si caadi ah labadii todobaadba mar, laga bilaabo Agoosto 2016 ilaa Agoosto 2017-keedii- kulan kasta wuxuu qaadan jiray labo saacadood.

**Tababarayaasha wada-hadalka bulshada:** wada-hadalka waxaa bixinayay koox tababaraal ah oo ka tirsan bulshada. Tababarayaashu waxay taageerayeen oo dhiirigalinayeen wada-hadal furan, laakiin wax saamayn ah kuma aysan lahayn jawiga doodda. Ma aysan jirin mawduucyo horay loosoo doortay si looga dodo, ama liis dhibaatooyin ah oo la xallinayo. Tababarayaashu waxay bulshada ku caawinayeen in ay sheegaann arimaha ay rabaan six xor ah, inay falanqeeyaan, ayna siyaabo kale u tusaan arrimaha ay ayagu doorteen.

Waxaa jiray 12 qof oo ahaa tabarayaasha wada-hadalka oo laga soo qortay bulshada dhexdeeda gaar ahaan labada dagmo (lix rag ah iyo lix dumar ah). Laba kasta waxay ka shaqaynaysay hal koox wada hadal. Tabarayashu waxay qaateen 5-bari oo casharo tababar ah oo ku saabsan casharada iyo aaladaha khilaafka, jinsiga, nabad dhisidda iyo wadahadalka taas oo ay intaa u raacsanyihiin laylisyo iyo tusaalooyin. Tababarka la siiyay tababarayaasha wuxuu lahaa 3 ujeedo oo waawayn:

- In labaro tababaraaysha mashruuca wada-hadalka, yoolalkiisa, hababkiisa, iyo in la ogaado aragtiyadooda, iyo afkaartooda ku aadan sidii loo meel marin lahaa mashruuca iyo sidii loo wajihi lahaa xubnaha bulshada iyo maamulka deegaanka.
- In tababarayaasha la fahamsiiyo aragtida nabad-dhisidda,sida khilaafka, jinsiga,nabadda, iyo wada-hadalka.
- In la baro xirfadaha lagu daraaseeyo khilaafka iyo jinsiga, ayagoo isticmaalaya qaabab iyo aalado kala duwan.
- In tababarayaasha loo fahamsiiyo wada-hadalku inuu yahay hab iyo geedi socod iyo in ay lahaadaan xirfadaha lagu daadihiyo wada-hadalka.

Tababarka waxaa laga damacsanaa in uu fahamsiiyo arrimaha khilaafka ee ka jira bulshadooda ayagoo ka eegaya dhinacyada jinsiga iyo khilaafka, iyo aragti nabadeed. Aragtidaan ka qabnay wuxuu ahaa in ay daadihin karaan wada-hadalka hadii ay faham guud ka haystaan isku xirnaanshaha arimaha khilaafka iyo jinsiga (raga iyo dumarka).

**Tababare-kormeeryaal:** mashruucu wuxuu lahaa 3 tababare-kormeere oo ay shaqadoodu tahay in ay tababar siiyaan tababarayaasha bulshada, la taliyaan, kormeeraan inta uu socdo geedi socodka wada-hadalku. Tababare-kormeerayaashu way bixiyeen tababarka waxayna sii raaceen tababarayaasha si ay ula tababaraan kooxaha bulshada. Tababare-kormeere kasta wuxuu la socday hormarka ay sameeyaan labo koox wada-hadal wuxuuna caawinayay tababarayaasha.

**Indho-indheeyayaal:** indha-dheeyayaashu waxay qayb ka ahaayeen kooxda qiimaynta iyo indha-indhayta kuwaas oo qorshe iyo hab-raac u keenay mashruuca. Indhe-indheeyayaashu waxay la socdeen geedi socodka wada-hadalka waxayna aruurinayeen xogta uga imaanaysa kulanka taas oo ku salaysan astaamaha ay raacayaan. Dabeecadaha mudan in la qoro, iyo sida loola socon karo isbadaladaas.

**Hawlwadeenada kooxda wada-hadalka:** Kormeerayaasha iyo indho-indheeyayaasha (oo ay weheliyaan shaqaale muhiim ah oo ka tirsan mashruuca) waxay sameeyeen koox ka ciyaartay kaalin mugleh sidii loo hormarin lahaa mashruuca iyo geedi socodka wada-hadalka, ayaga oo tababar siinayay tababarayaasha lana xiriirayay maamulka deegaanka. Kooxda waxay taageero ka helaysay koox lataliyayaal ah oo u dhuunduleelay arimaha khilaafka iyo jinsiga, kuwaas oo hawlwadeenada kooxda wada-hadalka siinayay tababaro aqoontooda kor loogu qaadayo, waxay soo qabanqaabiyeen tababarro taxane ah oo lagu baranayay khilaafka iyo jinsiga, wadahadal iyo xirfado ku saabsan sida loo daadihiyo kulamada, ayada oo ay intaas dheertahay tababaro ay siinayeen tababarayaasha. taasu waxay hawlwadeenada kooxda wada-hadalka u suurto galisay in ay la imaadaan in ay tababaro u qabtaan tababarayaasha oo ku saabsan sidii ay fahmeen hawsha iyo in ay gacan ku siiyaan daadihinta wada-hadalka. Hawlwadeenada kooxda wada-halku waxay sidoo kale soo aruuriyeen jawaab celin tababarayaasha iyo xubnaha ka tirsan bulshada kuwaa oo ka qayb qaatay wada-hadalka kuwaas oo u sheegay sidii ay wax u arkayeen iyo fahamkoodii. *Wada-hadal haa-han waa natiijadii kasoo baxday dadaalkii hawlwadeenada kooxda wada-hadalku kuwaas oo qoray casharadan isla markaana dib ugu soo celiyay bulshada si ay u adeegsadaan,u hormariyaan ugana faa'iidaystaan.*

# 2. Saamaynta uu leeyahay wada-hadalka Bulshada

Qaybtan waxa ay soo koobaysaa saamaynta uu leeyahay geedisocodka wadahadalku. Dhibaatooyinka uu leeyahay cabiridda iyo qiimaynta wada-hadalka ma yaraynayso qiimaha iyo faa'iidada uu u leeyahay nabad-dhisidda. Wada-hadalku markasta waa muhiim sababta oo ah danta gaarka ah oo laga leeyahay ayaa ah xoog saaridda in ay dadku isfahmaan isna dhaafsadaan aragtiyadooda iyo in ay hagaajiyaan xiriiradooda. Ayada oo ay ku xiran tahay hadafyada laga leeyahay wada-hadalka iyo xaaladaha ku xeeran, waxaa la adeegsan karaa cabiraado iyo tilmaamo kala duwan. Waxaa lagu qiimayn karaa saddex heer:

- Saamaynta uu ku yeeshay dadkii ka qayb qatay, sida dabeecado is badalay ama qaabab cusub oo dabeecad ah oo soo kordhay,is badallo ku yimid xiriiro, is fahanka iyo is aaminka xubnaha bulshada dhexdeeda ah.
- Natiijooyinka-gaar ahaan marka laga eego dhanka fikradaha, soo jeedinta, cabiraadaha la sameeyay iyo abaabulada uu keenay geedi socodku.
- Saamaynta uu wakhtiga dheer ku leeyahay guud ahaan khilaafka laftirkiisa.

## Saamaynta ay kulamada wada hadalku ku yeeshay ka qayb galayaasha

Ka qayb galayaasha geedi socodka wadahadalka waxay arki karaan isbadallo qofeed, sida dabeecada,aragtiyada, aqoon dheeri ah iyo waliba kalsooni.

Isbadalka ku yimaada xiriirada u dhexeeya ka qayb galayaasha kawada tirsan hal koox waxaa sidoo kale loo aqoonsan karaa saamayn uu ku yeeshay wada-hadalku ka qayb galayaasha. Isbadalku wuxuu ka bilaaban karaa isbadallo yar oo ah sida ay ka qayb galayaashu isku arkaan dhexdooda, ama sida ay u wada xiriiraan, ama

**Tusaalooyin loo doodayo koox koox- Guurka yaraanta**

Arinta guurka yaraanta waxaa looga hadlay inta badan kooxaha wadahalka, waliba inta badan waxay doodaas imaanaysa marka ay ka qayb galayaashu isbartaan oo ay dareemaan in ay u hadli karaan si xor ah oo furan. Waxa uu ahaa mawduuc abuuray doodo kulul iyo kala aragti duwanaansho wayn. Waxay kooxaha wada-hadalku u qayb sanaayeen kuwo u doodaya in aan la ogolaanin guurka yaraanta iyo kuwo ugu qiil bixinayay guurka yaraanta in ay keenay dhaqan iyo xaaladda lagu jiro. Dadka kasoo horjeeday guurka yaraanta waxay goobta ka sheegeen sheekooyin ayaga ku dhacay ama ay goob jog u ahaayeen oo ku saabsan guurka yaraanta, ama waxay tusaalooyin usoo qaadanayeen gabdhahooda oo lagu guursaday yaraan ka dibna uu ka burburay qoyskoodii. Sida la fili karo, dhacdooyinka qofeed ama kuwa goob joogga ay u ahaayeen ka qayb galayaashu waxay ahayd mid adag waxa ayna sabab u noqotay in kooxda dhan ay wadaagaan fahanka khatarta uu leeyahay guurka yaraantu, halista,iyo sida uu uga mid yahay tacadiyada ka dhanka ah gabdhaha. Arrintan wakhti bay qaadatay ee ma aysan ahayn mid iska timid, laakiin waxaa jiray dareen ah in ay si dhab ah u dhagaysteen sheekooyinka markaasta ay u suurto gashay in ay arinta u fahmaan sida ay u arkaan dadka kale oo la wadaagay.

Kooxdu waxay xataa la imaadeen wax yaabihii la isku af gartay oo ah sidii loo bilaabi laha olole ka dhan ah guurka yaraanta, tallaabada ugu horraysaynay waxay ahayd sidii haweenka ay uga qayb qaadan lahaayeen nolosha iyo in nimankoodu ay u ogolaadaan in ay go'aanadooda gaaraan, raggi ku jiray kooxda way ku raaceen waxayna ballan qaadeen in ay ayagu bilaabi doonaan oo ay tusaale uu noqon doonaan, iyo in ay u ololayn doonaan sidii dariska iyo xubnaha qoyska iyo bulshada u dhawba ay arrintaas ula qaadan lahaayeen.

sida ay isku aaminaan-laakiin isbadaladaas waxa ay billaw u noqon karaan hanaan isbadaleed. Inta lagu guda jiro kulamada wadahadalka waxaan indho-indhayn karnaa billawga isbadalo yaryar oo dadka ku dhaca iyo isbadallo ku yimaada xiriirada u dhexeeya ka qayb galaaasha wada-hadalka.

Halkan ka eeg qaar ka mid ah tusaalooyinkaas:

| | |
|---|---|
| **Aqoon** | *"faa'iidada kale waxay tahay in ay ka qayb galayaasha oo dhami aysan ogayn dhibaatooyinka kala duwan ee bulshooyinkooda haysta, sidaa darteed waxay bartee wax badan waxayna fahmeen wax badan. Sida oo kale waxaa wax caadi ah u noqday in ay ka hadlaan arimaha adag, waxyaalaha awal ay u haysteen in ay ceeb tahay sida kufsiga".* |
| **dabeecado** | *"waxaan ka helay wax badan inta uu socday wadahalku; waxay ahayd markii iigu horraysay ee aan ka qayb galo dodo aan ka faa'iidi karo fikradaha ka qayb galayaasha kale; waxay maskaxdayda u furtay dunida; waxaan dareemi jiray xishood markii aan damco in aan hadlo waxaan ka baqi jiray in aan dadka soo hor istaago; laakiin wixii ka danbeeyay todobaadkii saddexaad ee wada xaajoodka waan isbadalay waxaana noqday geesi waaxanna dadka la wadaagay afkaartayda."* |
| **Dhaqan** | *"waxaan ogaaday in dhammaanteen aan wadaagno dhibaatooyin isku mid ah maadaama aan ka nimid hal bulsho. Laakiin hadda, waxaa macquul ahayd in aan la doodno, sababtoo ah annaga ayaa go'aansanay in aan u baahanahay in aan wada hadalno."* |
| **Xiriirro** | *"dhawr kulan ka dib kooxdu waxay ogaatay muhiimadda uu leeyahay fahamku, kaliya ma ahan dhibaatooyinka bulshada haysta laakin in ayagu ay is fahmaan."* |

### Natiija-afkaarta, cabiiraadaha la sameeyay, hal-abuurka

Heer kale oo uu wada-hadalku uu saamayn ama isbadal ku keenay waa natiijooyinka, sida afkaarta, hindisooyin iyo cabiraado wax ku ool ah oo ay kooxaha wada-hadalku ay soo bandhigeen. Waxa aan awoodnay in aan qorno waxay ahaayeen afkaarta wax ku oolka oo ku saabsan sida wax looga qaban lahaa arrimaha ay kooxdu soo bandhigtay, tallaabooyinka qaar ay isku raaceen in ay qaadi doonaan, iyo dhawr hal-abuur oo ay soo bandhigeen.

Waa kuwan qaar ka mid ah tusaalooyinkaas.

> ***"markii aan la wadaagay bulshada, way isoo dhaweeyeen waxayna ii sheegeen in ay bulshada muhiim u tahay waxa ayna diyaar u yihiin in ay i taageeraan waxaana qorshaynay in aan billawno wada-hal bulsho oo ku saabsan sidii wax looga qaban lahaa daadka."***
>
> ***"mawduucyada kale ee looga dooday bulshada dhexdeeda oo aan u malaynayo in aan u qaban doonno wada-hadal waa: sidii aan nabad uga dhex dhalin lahayn bulshada dhexdeeda, sidii aan u daryeeli lahayn carruurta darbi-jiifka ah, tahriibka iyo kuwa la midka ah."***

## Saamaynta uu wakhtiga dheer ku leeyahay guud ahaan khilaafka laftirkiisa

Kooxaha wada-hadalku waxa ay awoodeen in ay abuuraan xiriiro kooxda dhexdeeda ah taas oo usuurto galisay in ay xoojiso is aaminaada dhexdooda ah, si ay fursad u siiso dadka kala duwan in ay soo gudbiyaan tabashadooda,tixgalin siiyaan dadkale afkaartooda, in ay soo bandhigaan mawduucyo adag si looga dodo, iyo sida ay kooxdu horray ugu socon lahayd oo ay u bilaabi lahayd wax qabadyo isbadal keenaya. Kooxaha wada hadalku waxa kale oo ay awoodeen in ay fahmaan dhibaatooyinka sida ay dadka kale u arkaan, taas ay ku jiraan

waxyaalaha ka dhalan kara kooxaha kala duwan iyo in la fahmo faa'iidooyina iyo dhiiranaanta ay leeyihiin jilayaasha kala duwan. Waxa ay awoodeen in ay ku soo daraan arinta haweenka dooda. Waxa kale oo ay awoodeen in ay dood ka keenaan caadooyinka bulshada kuwaas oo ay ka dhashaan tacadiyo halis ah iyo siyaasadda dawladda iyo qaybaheeda kale ee joogtaynaysa xaaladda taagan.

Hadaba, waxa aan ka filan karno wada-hadalkaas waa in uu saamayn wanaagsan ku yeeshaa khilaafka marka laga eego in bushada la baray sidii ay ula tacaali lahaayeen dhibaatooyin adag. Abaabulka wada-hadal bulsho waxaa uu ahaa hage iyo in loo adeegsado sidii loo hubin lahaa in ay bulshadu u aragto in uu ku haboonyahay, hadii ay u arkaan inuu wanaagsan yahay iyo in ay ka go'antahay in ay joogteeyaan. Wax yaalahaan helnay waxa ay ina tusayaan in bulshooyinku ay ku dhiiranyihiin in ay sii u joogteeyaan wada-hadalka "qaabkooda goonida ah" si ay ugu adeegsadaan in ay uga shaqeeyaan dhibaatooyinka bulshooyinkooda haysta oo ka baxsan mashruucan. Waxaa jirta suurto galnimo ah in la joogtayn doono ayna macquul tahay in wada-hadalku uu saamayn wanaagsan ku yeesho xaaladaha khilaafka.

Tusaalooyinkan waxa ay ina tusi karaan sida wada-halku uu saamayn ugu yeelan karo khilaafka muddada fog:

> ***"ka qayb galayaashu waxa ay bilaabeen in ay bulshooyinkooda kula laabtaan talooyin ay ka qaateen kulamadii wada-hadalka. Waxaan arkay saamaynta uu wadahadalkeenu ku yeeshay hal xero oo ay daganaayeen barakacaal (IDP Camp) oo ku taalla degmadeenna,sababta oo ah waxaan arki jiray galabtii ama fiidkii marka uu dhammaado kulanka wada-hadalku ayagoo inta ay isku imaadaan ka hadlaya arimaha ay tabanayaan oo khuseeya."***

**Tusaalooyinka doodihii Kooxaha – tacadiyada ka dhexdhaca guriga**

Qoysku waa unug laga dheehan karo dhammaan dhibaatooyinka bulshada ka dhexdhaca waxaana la arki karaa maalin walba. Tacaddiyadda qoysku wuxuu ahaa mawduuc laga doodayay laga soo bilaabo markii uu geedisocodka wada-hadalku uu marayay dhexdhexad ilaa dhammaadka mashruuca. Waxay u ekayd in bulshooyinku aysan awoodin in ay kafakaraan qaababka macquulka ah oo isbadal lagu keeni karay. Taas waxa ay ina tustay in loo baahnaa wakhti intaa kabadan iyo sidoo kale in loo baahan yahay in wada-hadalka lagu dagu soo daro dad kala duwan oo leh aragtiyo kala duwan si looga doodo arinta. Doodan waxay marmarka qaar caqabado kala kulmaysay, ayada oo laga dooday mawduuc muhiim ah in ay jireen isku dayo in laga dhigo mawduuca qosol iyo kaftan si loo inkiro muhiimadiisa. Kooxdu waxay fahmeen in tacadiyadda ka dhaca qoyska dhexdiisa ay keeneen dabeecada, iyo qaabka dadku ay u haystaan dhaqanka (haweenku waa tabardaranyihiin waana in la edbiyaa, tacadiyada ka dhexdhaca qoyska waxa ay astaan u yihiin jacayl, nimanku waa in ay muujiyaan in ay leeyihiin maamulka iyo awoodda-ayaga oo adeegsanaya tacaddi) sidoo kale waxa la isla fahmay in ay ka dhalatay xaaladda lagu jiro iyo arimo asaasi ah (aqoon la'aan' awood siin xadidan oo la siiyo dumarka' jahwareer ka yimid dhaqaale la'aan' si xad-dhaaf ah oo loo isticmaalo balwadda). Waxaa kale oo la sheegay in nimanka xataa uu saamayn ku yeesho tacadiyadda qoyska ka dhexdhaca.

Ayada oo ay jiraan caqabado, kooxuhu waxay hadana soo gudbiyeen tallooyin sidii loo bilaabi lahaa isbedal. Ugu horrayn wadaad ayaa kooxda ku dhaleeceeyay in ay aaminsanyihiin in ay diintu taageersantaahy tacadiyadda ka dhanka ah haweenka. Isla markiiba kooxdu way ka jawaabtay, oo waxa ay waydiiyeen in wadaadka iyo wadaada kale ay bulshada u hadlaan oo ay ka wacyi galiyaan bulshada tacadiyada ka dhaca qoyska iyo tacadiyadda kale oo ka dhanka ah haweenka. Waxaa la isku raacay in ay tahay kaalin muhiim ah oo ay leeyihiin wadaadu. Waxaa kale oo jiray talooyinkale oo ay ku jireen in haweenku ay samaystaan kooxo taas oo looga gol lahaa in haweenku ay si intaa kabadan uga qayb qaataan nolosha bulshada, kana soo baxaan guryaha ayna si mug leh uga qayb qaataan go'aan qaadashada bulshadooda dhexdooda.

# 4. Sida loo hago

Qeybtan waxay si kooban u sharxaysaa tilaabooyin door ah iyo tallooyin lagu horumarinayo laguna hirgalinayo mashruuca wada-hadalka bulshada.

## 1. Ku billow qiimeynta

Daraasad lagu sameeyo deegaanka waxaa ka mid noqon kara daraasad deegaan oo heer qaran ah si aad u ogaato waxyaabaha saameeya bulshooyinka. Gaar ahaan, daraasad heer degmo ah waa lagama maarmaan si aad u fahamto cida kulug leh, isbaddalada iyo arimaha ka jira bulshadaas. Tani waa inay ku jiraan u kuurgelida baahiyaha iyo hal-abuurada horay uga jiray degmooyinka, doorka cida wada-shaqaynta aad la leedahay iyo awoodaada. Habka ugu wanaagsan waa daraasad laga wada qeyb qaato.

Waa inaad u yeelataa foojignaan dheeri ah arimaha amniga, dhageysataana bulshada iyo waxyaabaha ay ka walaacsantahay. Waa inaad fahansantahy inay jiraan kara fikrado kala duwan oo laga qabi karo arimahha amnigga. Waxaad u baahantahay qorshe si loola tacaalo caqabaddaha dhanka amnigga loona abuuro fursado wax kala doorasho si wax looga qabto arimahha amnigga-waa inaad muujisaa jajabnaan si aad ula janqaado waxna uga qabato xaalada is-bedbedelaysa.

## 2. La shaqee bulshooyinka

Bulshooyinku waxay u baahan yihiin inay ka qeyb-qaataan waxna ku kordhiyaan sameynta qorshaha wada-hadalka. Wacyi-gelinta, shirarka bulshada, wada-hadalka bulshada, wareysi-kooxeedka - dhamaan kuwani waxay ka mid yihiin siyaabaha aad ugu gudbin karto ra'yigaagga una dhageysan karto bulshada. Tani waxay horseedaysa inay ogaadaan baahiyahooda ayna soo jeediyaan sida wax looga qaban karo. Habkani waa inuu noqdaa mid bulshadu leedahay. Arintani waa mid muhiim ah maadaama ay saldhig u tahay sii jiritaanka geedi-socodka. bulshada ayaa ka dhigi karta geedi-socodkan mid faa'iido u leh sidoo kalana la xiriira arimahheeda.

## 3. Ka qeyb-geli maamulka

Deegaanka kasta ee laga hawlgalayo waxaa wanaagsan in wada-shaqeyn dhow lala yeesho maamulka gaar ahaan, Muqdisho aad bay muhiim u tahay. Xiriir lala yeesho maamulka iyadoo aan awood loo siinayn go'aamadda xasaasiga ah ee barnaamijka waa arin la aqbali karo balse adkaan karta. Waxaa muhiim ah in la xaqiijiyo in wada-hadalku noqdo mid bulshadu leedahay.

**Tusaale ku saabsan dooda kooxaha – Barakacayaasha (IDPs)**

Waxaa jira xiisad ka dhaxeysa barakacayaasha iyo dadka deegaanka ee Muqdisho. Dadka deegaanku waxay u arkaan barakacayaasha kuwo ka faa'iideysanaya hay'addaha gargaarka, inkastoo ay yihiin kuwa taagdaran. Dadka deegaanku waxay dalbanayaan in barakacaayshu ku laabtaan goobihii ay ka yimaadeen. Barakacayaashu waxay isu arkaan kuwo baahan waxayna ula muuqataa in dadka deegaanku yihiin kuwo ladan iyadoo dadka deegaanku weli ku tiirsan yahiin gargaar. Barakacayaashu ma doonayaan inay dib ugu laabtaan sababtoo ah ma haystaan meel ay aadaan ama qayraad ay isku haleynayaan

Dooda qodobkan waxay ahayd mid kulul mana dhaafsiisnayn eedayn kooxba kooxda kale ay u jeedinaysay. Xitaa falanqeyntu ma ahayn mid laga gudbayo kooxuhuna ma fahmi karin si loola tacaalo arintan. Sidoo kale tababarayaasha ayaa ku wareeray arinta maadaama iyaga xitaa loo arkayey inay ka mid yihiin dadka deegaanka. Kooxuhu waxay dareensanaayeen in aysan isku aragti ka qabin arinta barakacayaasha. Mar ayey doodu qaadatay casharka oo dhan ilaa ay dad ku daaleen casharkuna dhamaaday arinkana lama soo qaadin mar danbe. Tababarayaashu waxay u arkayeen doodan mid daal leh.

## 4. Sii tababar

Tababarida gudi-hawleedka (kuwa kormeeraya barnaamijka) mowduucyada la xiriira mashruuca sida: nabad dhisida, khilaafka, jinsiyad, wada-hadal. Tababarku ma ahan mid mudo gaaban socda ama dhacdo qura ah. Ugu horeyn waxaan ku billownay tababarida gudi-hawleedka wada-hadalka iyadoo la sameeyey dhowr jeer mudadii labadda sano aheyn ee mashruucu socday. Tani waxay na siisay fursad aan ku dabakhno xirfadaha kuna hirgalino waxyaabihii laga bartay mashruuca heerarkiisii kala duwanaa. Waxaa kale oo muhiim ah iyadoo hoseeday in gudi-hawleedka wada-hadalka ay wax ku yeesheen barnaamijka intii uu socday mashruuca oo dhan.

Ogaanshaha doorka xubnaha kooxda iyo ku tababarida waxa shaqadoodu tahay. Gudi-hawleedka wada-hadalka waxaa loo qeybiyey saddex koox-hoosaad oo ka kooban: tababarayaal/kormeerayaal; kooxda mashruuca iyo koox qaabilsan qiimeynta iyo daba-galka. Dhamaan kooxaha waxaa la siiyey tababaro is daba jooga ah iyo tababarka tababarayaasha.

## 5. Tababar dheeri ah

Tillaabada xigta waa in la shaqaaleysiiyo lana tababaro fududeeyayaasha tababarka wada-hadalka. Waxaan ogaanay waxyaabo badan. Mida koobaad waa in tababarayaasha casharada wada-hadalka laga keeno bulshada dhexdeeda oo aanay noqon kuwo ka baxsan. Waa inay u shaqeeyeen labo-labo iyo kooxo si ay isu kaashadaan una wadaagaan xirfadahooda sidoo kalana qofba qofka kale wax uga barto. Waxaan rabnay koox tababarayaal ah oo isu dheelitiran dhanka jinsiga (rag iyo dumar) sidaa darteed waxaan sameynay koox dhamaanteed ka kooban dumar iyo koox dhamaanteed ka kooban rag. (Tani waxay muujisay qeybaha ay ka koobmi karaan kooxaha wada-hadalka) tayeynta tababarayaasha wad-hadalka waxay ahayd mid muhiim u ah barnaamijka. Waxay ahayd fursad lagu wadaagayo ujeedooyinka iyo yoolka mashruuca wada-hadalka, si loo abuuro fahan guud oo ku saabsan sababta iyo siyaabaha wada-hadalka loo isticmaali karo, loona kobciyo xirfadaha tababarka wada-hadalka, fahamka khilaafka, jinsiga iyo wadooyinka loo maro nabadeynta.

## 6. Samee kooxo wada-hadal

Sii bulashada fursad ay kaga qeyb-galaan wada-hadalka kana dooro ka qeyb-galayaasha. Markii fududeeyayaasha casharada la tababaray waxay ka qeyb qaateen abaabulka bulshada iyo xulista ka qeyb-galayaasha u matalaya deegaankooda wada-hadalka.

**Fahanka hanaanka wada-hadalka** – Iyadoo ay jiraan hay'addo badan oo caalami ah oo ka hawlgala magaalada Muqdisho kuwaas oo ku hawlan gargaarka bina'aadannimo iyo maareynta mashaariic horumarineed hadana tiro aad u yar ayaa ka shaqeeya kana dhiga barnaamijkoda ugu weyn nabadeynta. Tani waxay keentay in dadku sameystaan 'xeelado u gaar ah' oo ay la qabsadeen. Bulshadu waxay barteen sida loola macaamilo iyo waxa laga filo karo hay'addaha, sida looga qeyb-qaato iyo weliba sida looga jawaabo su'aallaha marka la weydiiyo.

In lala yimaado hab cusub oo ka duwan habkii shaqo ee horay u jiray ayaa ahayd caqabad weyn waxayna u baahneyd in aad loo darso kooxda iyadoo lasoo billaabayo hawsha sidoo kalana laga tago wixii aan loo baahneyn. Mid ka mid ah caqabaddihii ugu weynaa ayaa ahayd in la dabakho habkii nabadeynta ee aan wadnay looguna ogolaan lahaa bulshada inay yeelato geedi-socodka go'aana uga gaarto.

Mashaariicdii kale ee laga fuliyey isla deegaanka, bulshada waxaa la tusay waxa ay doonayaan inay is-badel ku sameeyaan iyo habka ay u marayaan intaba. Waxaa la siiyey qoraal ku saabsan sida la rabo in wax noqdaan iyo qorshayaal ay raacaan kuwaas oo ay ka heleen hay'addaha ku lug leh horumarinta. Waxay maanka ku hayeen in warbixinta iyo hagida kor uga imaan doonto bulshaduna tahay mid qaadata oo keliya. Shaqaallaha mashruuca ayaa iyaguna isla taas aaminsanaa iyagoo shaqadoodu ahayd fulin. Shaqaalluhu waxay haysteen buugta haga tababarayaasha, tillaabooyin iyo hab degsan oo laga doonayey inay ku daba galaan bulshada.

Shaqaalaha mashruuca ayaa iska kaashanayey dejinta habka shaqada iyagoo aan ogeyn arimaha ay bulshadu doonayso inay ka hadasho. Waxaan raaacnay hab kaasoo ay gudi-hawleedka wada-hadalku hagayeen dhamaan heerarkii shaqo ee wada-hadalka laga bilaabo tababarida fududeeyayaasha wada hadalka iyo koormeerida iyo daba-galka geedi-socodka wada-hadalka.

## 7. Ka qayb galayaasha u ogolow in ay cabiraan wax yaalaha ay rajaynayaan

Waa muhiim in loo cadeeyo ka qayb galayaasha u jeedada iyo habraaca wadahadalka iyo in la siiyo fursad ay ku cabri karaan waxyaabaha ay ka filanayaan wadahadalka. Ka qayb galayaasha mashruuca iyo tababarayaasha waxaa laga filayaa in ay si dagdag u xaliyaan dhibaatooyinkooda. Xubnaha bulshada waxa ay soo gudbin jireen arimaha ay kukala aragti duwan yihiin kulankasta oo uu wadahadalku qabsoomo, waxa ayna go'aan ka gaari jireen mid ka xoogga la saarayo kulan walba. Arrintan darted waxay keeni jireen xulashooyin iyo xalal macquul ah. Waxaa laga filayay in ay awood u leeyihiin in ay xal u keenaan hal dhibaato kulankasta oo uu qabsoomo wadahadalku. Taasu ma aysan dhacayn, marka waxaan ku caawinay ka qayb galayaasha in ay ka gudbaan qaabka ay u wajahayeen xal u helidda dhibaatooyinka oo ay u wajahaan qaab isbadal keenaya. Waxa aan xoogga saarnay in aan kooxda ka dhisno -qaabka ay u xiriiri lahaayeen, isku aamini la'haayeen, in ay xor u noqdaan cabiraadda dareenkooda oo ay si wadajir ah xal ugu raadiyaan arimaha taagan, in ay is ixtiraamaan, iyo in ay qiimeeyaan afkaarta dadka kale, IWM.

Tani wakhti bay qaadatay laakiin ugu danbayntii intii ay kooxdu ay xal u raadin lahayd dhibaatooyin, kooxuhu waxay bilaabeen in ay si wadajir ah u keenaan abaabullo iyo qorshayaal ay wax uga qabanayaan arrimaha ay danaynayaan, kooxuhu waxay bilaabeen in garwaaqsadeen fursadda ay leedahay in ay sawadajirah baaraan arimaha ay danaynayaan, waxayna marar ka dhawaajiyeen suurto galnimada in ay si ka duwan wax u qabtaan sababtoo ah way is aamineen. Xubnaha qaarkood waxay awoodeen markii ugu horraysay in ay aragtidooda usoo gudbiyaan sidii ay rabaan. Markii afkaartoodii la qiimeeyayna,waxay dareemeen in la aqoonsaday oo tixgalin la siiyay. Taasu waxay awood siiyay xubnaha wadahadalka ka qayb galay.

Wadahadalku wuxuu abuuray in filashooyin ay ka yimaadaan bulshooyinka, hadii aysan noqon filashooyinkaas kuwa la joogteeyana saamaynta uu leeyahay ama uu lahaan karo waxa ay noqonaysa mid dhunta. Sidoo kale waxa ay bulshooyinka ku dhalin karaan in ay dhibsadaan hay'adaha inta ay yimaadaan shaqaynaya muddo yar ka dibna tagaya.

Waxaa kale oo muhiim ah in la maareeyo filashooyinka ka qayb galayaasha iyo tababarayaasha ee ku saabsan waxyaalaha loo siinayo si loo dhiiri galiyo ama faa'iidooyinka kale oo ay ka helayaan mashruuca. Tusaale ahaan, Malaga bixin doonaa ka qayb galayaasha lacagta gaadiidka ama ma la siin doona cabitaanno la isku qaboojiyo? Waxaa kale oo muhiim ah in si cad loogu sheego faa'iidooyinka ay ka helayaan mashruuca si loo dhiiri giliyo marka uu geedisocodku billaw yahay.

## 8. Ha iloobin saadka

Ka fikir goobta lagu qabanayo, qorshaha ammaanka, iyo diyaarinta saadka. Go'aan ka laga gaaro meesha lagu qabanayo kulamada wadahadalka waxa uu noqon karaa mid leh muhiimad wayn marmarka qaar. Hal arin oo dhacday, goobta lagu qabanyay waxaa lahaa daneeye awoodleh oo deegaanka ah, laakiin taas ay ka dhignayd in uu saamayn ku lahaa cidda imaanaysa kulamada wadahadalka. Taasu waxa ay keentay in dadka qaar ay dareemaan ammaan darro. Ammaanka Muqdisho wali waa arrin walaaceeda leh, dadka ku lugleh mashruucana waxay u lahayd walaac wayn. Waxay saamayn ku yeelatay qaabkii loo qorsheeyay mashruuca si loo hubiyo nabad geliyada iyo in ay xubnaha bulshadu ee ku lugg leh mashruuca ay fasax uga heli lahaayeen maamulka degmada.

## 9. Fahan isbadalka awooddaha deegaanka

Dhammaan bulshooyinka waxaa saameeya isbadalo awooddo oo kala duwan heer kastana leh. Daraasadeenii hore oo asaasiga ahayd waxaan diirad ku saarnay in fahanka qaab-dhismeedka qabiilka iyo isbadalada awooddeed oo ka dhaca in ay muhiim tahay. Tusaale ahaan, waa muhiim in la fahmaa sida qabiiladu ay u kala dagan yihiin degmooyinka, in ay yihiin qabiilada ugu badan iyo in laga badanyahay iyo qaabka ay saamaynta uga

yeelan karaan dhinacyada arrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda. Taas waxay saamayn ku yeelanaysa qorashada tababarayaasha iyo xulashada ka qayb galayaasha.

Caqabad kale oo soo wajahday hawl wadeenada mashruuca waxay ahayd fahamka khilaaf ka yimid in haweenka loo ogolaan karo in ay ka qayb qaataan dood ay ku jiraan rag. Waxaa jiray dareen ah in haweenka aysan raga kala qayb qaadan Karin doodahaan oo kale. Guddi-hawleedku waxay qaadaatay xulasho ah in la sameeyo kooxo gooni u ah haweenka iyo kuwa raga gooni u ah, ugu yaraan marka lagu jiro isdiyaarinta. Xulashada kalena waxay ahayd in lala tashado bulshada oo la waydiiyo talooyinkooda. Waxay doorteen kooxo isku dhaf ah. sidaas oo ay tahay wali waxaan jiray koox wada haween ah, iyo koox wada rag ah, si la isugu dheeli tiro. Guud ahaan, xirxirnaantu way yarayd waxaana jiray furfurnaan badan iyo u diyaarsanaan in wax labadalo ah lagana hor imaado caadooyinka xun xun oo ka dhanka ah haweenka in ka badan intii aan filaynay. Waxaan baranay marka bulshada loo daayo in gaarto go'aanadeeda in ay qaadanayaan masuuliyad wayn ayna ka qayb galinayaan qaybaha kala duwan ee ay ka kooban yihiin kooxaha bulshada, iyo in ay intaa ku darayaan in ay su'aal ka keenaan xeerarkii busho-dhaqan ee jiray. Taasu waxay keentay dhiiri galin wayn.

> Kuwani waa qaybo ka mid ah dhibaatooyinka ay keeneen isbadbadalka qabiiladda:
>
> - Qabiilka ugu badan goobta waxay qabeen aragti ah in aysan hogaaminayn geedi socodka ama ay luminayaan awoodda go'aan gaaridda. Waxay jawaabtoodu ahayd in ay muujinayeen in ay taasi hor istaagi karto mashruuca.
> - Amni daradi heerkeedu sarreeyo waxay adkaynaysay in qabaa'ilada laga tirade badanyahay ay imaadaan wadahadalka waxayna taasi halis ku ahayd in ay ka maqnaadaan geedi socodka.

Da'du waxay dhaqan ahaan ka ciyaartay kaalin wayn. Way yarayd Kalsoonida Da'yarta (oo leh qaybahooda kala duwan) in ay cabiraan aragtiyadooda mana aysan ahayn kuwo dhiirran billawgii hore. Intii lagu guda jiray wadahadalka waxay heleen kalsooni waxay fursadooda uga faa'iidaysanayeen in ay saamayn ku yeeshaan go'aanada waxayna wax ku darayeen go'aanada. Hadii aan ka soo qaato hadal uu yiri qof ka mid ah bulshada "waxay iila mid tahay mir la abuuray; haweeneey dhalinyaro ah oo billawday in ay kor u hadasho, waxay badalaysa qoyskeeda iyo qaraabadeeda."

Halkan waa tallaabooyinka qaar iyo tallooyin kuu sahlaya in aad samayso billaw wanaagsan una dhigaya aasaas wanaagsan wadahadalka.

## Sida loo daadihiyo kulamada wadahadalka ee Bulshda

**way dii in ay cabiraan wax yaalaha ay ka walaacsan yihiin**

↓

**samee xeerarka kooxda, adiga oo ka qayb galayaasha ka codsanaya in ay soo gudbiyaan sida ay rabaan in loo wada shaqeeyo**

↓

**waxaad u sharaxaadaan sirta waxaana waydiisa kooxda in ay heshiis ka gaaraan dhawridda sirta**

↓

**wakhti ay xubnuhu isku bartaan iyo wakhti ay ku fikaraan sii**

↓

**bilawga wanaagsan aad ayuu muhiim u yahay, haka cabsan in aad wakhti siiso diyaar garow wanaagsan, in aan wax caddayso iyo in la is barto.**

### Tusaalooyin ka mid ah doodaha Kooxaha- jidadka iyo kaabayaasha-dhaqaalaha

Dhawr wadahadalo kooxeed ayaa ka dhawaajiyay dhibaatada ay leedahay jidadka burbursan. Taas kaliya ma aha in tayada jidadku ay xuntahay, laakiin dadka ayaa hareeraha wadooyinka ka dhistay jiingado, taas oo xirtay bullaacadihiim iyo jidadkii. Taas waxay inta badan keentaa isku dhaca dadka dariska ah ee degmooyinkaas.

Inta lagu jiray kulamada wadahadalka, xubnaha bulshadu waxa ay isku dayeen in ay fahmaan sida arinta ay u saamaynayso kooxaha kala duwan ee bulshadooda ka tirsan. Waxay hoosta ka xariiqeen in ay halista ugu badan u keento haweenka ayaga oo dib u dhac u keena marka ay isbitaalada u socdaan. Qaar ka mid ah kooxaha waxay ula muuqatay in jiingadaha waddooyinka ka dhisan ay nolol maalmeed u yihiin dad. Si kasta oo ay ahaataba waxay qireen in jiingaduhu ay dhibaato u gaystaan bulshada guud.

Kooxdu waxay kusoo gabagabaysay in loo baahanyahay in laga fakaro fayaqabka guud ee bulshada waxayna isku raaceen dhawr qodob in la sameeyo, kuwaas oo ay ku jiraan in maamulka deegaanka ay imaadaan oo ay la hadlaan dadka dhistay jidadka. Waxay kale oo go’aansadeen in ay xaafaduhu isku imaadaan si ay furaan bullaacadaha xiran iyo in la sameeyo wacyi galin ku saabsan sidii loo samayn lahaa abaabul-wadareedyo iyo waxqabadyo dan u ah bulshada guud.

## Maxaa laga heli karaa “sanduuqyadan” oo kaa caawin kara wadahadalka?

**habka loo wajaho nabaddhisidda**

- Waxaad fahansantahay in nabad dhisiddu ay tahay hab wax badan ay soo hoos galayaan, waxaad fiiro ula haanaysaa geedi socodka iyo natiijada, waxaad dhiiri galinaysaa lahaanshaha bulshada ee wadahadalka, waxaad fahamsantahay qaabka wadahadalka isbadalka keena waxaana tageeraysaa isbadalka maangalka ah.

**falanqaynta xaaladda haweenka iyo khilaafka**

- Waxaad haysataa qalabkii aad ku dhiraadhirin lahayd oo aad ku falanqayn lahayd khilaafka iyo xaaladda haweenka si aad u fahanto arimaha ay ka hadlayaan; adeegso si aad uga caawiso kooxda inay falanqeeyaan xaaladooda.

**xirfadaha lagu daadihiyo wadahadalka**

- Qalabkaaga ugu muhiim san ee fududaynta wadahadalka waa: in aad dib ugu noqotaa, soo koobtaa, su’aalana aad waydiisa si aad u hubiso, waxaad hubsataa in aad lasamayso iyo in ay bartaan sida loo isticmaalo.

**wadashaqaynta kooxda**

- Waxaad haysataa kaaliyahaaga dhanka tababarka si uu kuu caawiyo inta ay socdaan kulamadu; waxaad kula joogo kormeerkaaga si aad xog-waraysi ula yeelatid- oo aad kala hadasho arimaha caqabadaha kugu ah iyo si aad iskula eegtaan xulashooyin kale oo maangal aadna barataan.

Sikastaba ha ahaatee, ayada oo ay jiraan xirfadahaas iyo hababkaas iyo iskaashiga kooxda, waxaa ku qabsan karta arin adag oo aad garan waydo sidii uga fal celin lahayd ama aad samayn lahayd. Waxkasta uma socdaan sidii aad rabto markasta. Xasuuso, waxaad la shaqaynaysaa koox waxaana u baahantihiin in aad iskaashataan, oo aad wadaagtaa wakhtiga iyo hawsha idinka dhexdiina.

Waxaad kulamada qaar kugu soo aadaya in aad noqoto kormeere marka la gaaro dhammaadka kulanka waxaad sheegi kartaa caqabadaha aad la kulantay. Mana ay jiraan jawaabo dagdag ah oo diyaarsan laakiin waa in aad raadisaan xulashooyin kala duwan oo macquul ah.

## Xaaladaha ku xeeran wada-hadalka

Kuwani waa qaar ka mid ah caqabadaha ay tababarayaasheenu wajahaan iyo xulashooyinka ay arkeen in ay ku habboontahay in la adeegsado.

**Xaaladda 1aad.** Dhawr ka qayb gale yaasha soo daahay oo yimid wadahadalkii oo billawday.

***Maxaad samaynaysaa?***

***Xulashoyinka:***

- U jeedadu waa in lagu caawiyaa soo daahayaasha in ay dareemaan in lagu daray geedi socodka ayada oo la yaraynayo in isku dhexyaaca. Tababaraha/fududeeyaha waxaa uu usoo koobi karaa soo daahayaasha wixii dhaafay si ay uga caawiso in ay la qabsadaan.
- Kooxda waydii sidii ay ula macaamili lahaayeen oo ay ka yeeli.

**Xaaladda 2aad**. Kooxdu waxa ay u egtahay in ay caajiseen.

***Maxaad samaynaysaa?***

***Xulashooyinka:***

- Waxaad u sheegtaa kooxda waxa aad aragtid (hadii si kale aan u dhaho "waxay iila egtahay in kulankan maanta iinaan sifiican ula socon waxay iila egtahay in aad caajisteen; maxay idin la tahay in ay arintaa sababtay?
- Taalooyinka iyo falcelinta ay kooxdu ku siiso waxaad ku go'aansataa sidii aad yeeli lahayd.

**Xaaladda 3aad**. Mid ama dhawr qof ayaa doodaha kaligood un hadlaya dadka kalena kama qayb qaadanayaa.

***Maxaad samaynaysaa?***

***Xulashooyinka:***

- Waxay kuu la muuqto u sheeg waxaana dadka kale waydiisaa in ay dooda ka qayb qaataan.
- Soo koob u jeedada doodooda wada-hadalka ka dibna waxaad waydiisa in ay ka gudbaan oo horray uga socdaan.

**Xaaladda 4aad.** Tabaraha waxaa si wayn usoo jiitay mid ka mid ah arimaha laga doodaya waxaana ku adkaatay in uu dhexdhexaad ka ahaado.

***Maxaad samaynaysaa?***

***Xulashooyinka:***

- Xasuusnow in kaalintaadu ay tahay in aad caawiso geedi socodka doodaha; oo aysan ahayn in aad dhex gasho sida ay wax u dhacayaan.
- La wadaag arintaas kormeerahaaga. Xasuusnow in way adagtahay in la hago qof madax adag.

**Xaaladda 5aad.** Arrimaha laga doodayo ayaa dadka qaar ku abuuray dareen.

***Maxaad samaynaysaa?***

***Xulashooyinka:***

- Waa in aad ogaataa in arrimaha laga doodyo intooda badan ay wataan arimo dadka dareen galinaya. Taas waxaa inta badan sabab u ah in qof kasta uu noloshiisa usoo joogay wax yaalo ku dhaliyay xasaasiyado kala duwan. Xasuusnow in dareenka ka qayb galayaasha uu yahay mid ay xaq u leeyihiin. Midna sax ma aha midna khalad ma aha. Xogta dhabta ah baa inta badan doodda u furan laakiin dareenku maya.
- Kaalinta tababaraha waa in uu u tixgaliyo dareenka sida loo cabiray waana in uu qofka hadlaya ogaysiiyaa in la maqlay.

Kafikir caqabadaha ku soo wajaha raadina xulashooyin macquul ah si aad uga jawaabto.

## Mahadcelin

Hagahaan waxaa hormariyey/sameeyey Kooxda ka Shaqeysa ee Wada hadalka ee hey'adaha International Alert iyo CISP, iyagoo u maray barashadda ficil ee uu leeyaha Geedi socodka ama hannaanka wada hadalka.

Xubnaha Kooxda kashaqeynesay Wada hadalka waxa ay kala yihiin: Adan Sharif, Abdisalam Ibrahim, Moses Juma, Ali Abdi, Salah Kheir Abdille, Salad Ghedi Ali, Ali Mohamed Hussein, Khadija Abdullahi Jimaale, Zeinab Ali Hussein.

Hagahaan waxaa qortay Vesna Matovic oo taagero ka heleyso Ndeye Sow iyo George Grayson. Waxaan sidoo kale u mahadcelineynaa Eleneus Akanga oo ka tirsan (International Alert) taageeradiisa oo uu isugu keenay hagaha.

Hagahani waxaa turjumay Fatuma Aden Ahmed iyo Salman Said Mohamed.

Hormarinta hagaha waxaa maalgaliyey Sanduuqa Dhibaatada, Ammaanka iyo Amniga ee dalka ingiriiska (UK government's Conflict, Stability and Security Fund, CSSF).

**International Committee for the Development of Peoples**

**Email** cisp@cisp-ngo.org

**www.cisp-ngo.org**

/CISP.sviluppodeipopoli

@CISPorg

**International Alert**

**Email** info@international-alert.org

**www.international-alert.org**

/InternationalAlert

@intalert